Somaliska
Äldreomsorg för alla

Waayeelada dhammaantood waa in ay helaan xannaanad

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Dalka Iswiidan waa dal wanaagsan waayeelkana u habboon – waxaa ku nool dadka adduunka ugu cimri dheer. Waa arrin muujineeysa barwaaqada dalka, muruqgelintii ugu talagalka ahaa ee an ku dhaqaaqnay, taaso ujeedadeeda ahayd in ummadda oo idil ay ka faa'iideystaan waanu ku guleysanay. Imminka sidii hore ayaanu u halgamayna. Imminka waxaan ku dhaqaaqnay horumarinta xanaanada waayeelada. Waxaan doonayna in dowlada, maamulka gobollada iyo degmooyinka ay wadajir u hawlgalaan sidii loo gaari lahaa ujeedada in dalka Iswiidan laga dhigo dalka adduunka ugu wanaagsan waayeelnimada.

Muruqgelinta xannaanadda waayeelada way bilaawatay. Waxaa hirgelinay nidaamka kharashka ugu badan ee xannaanadda waayeelada. Da'weynta da'dooda ka sareeyso 65 sano waxaa loo dejiyay xadaynta kharashka daryeelka caafimaadka ilkaha. Maamulka degmooyinka iyo gobollada waxaa la siiyay awood dhaqaaleed oo dheeraad ah oo ay ugu hawlgalaan arrimaha xannaanadda waayeelada iyo daryeelka caafimaadka . Waxaa la xoojiyay kormeerida xannaanadda waayeelada. Sannadka 2006 waxaa heer afar ku dhufsan ah sare loo qaaday taageerada ehelada iyo ururrada madaxbannaan.

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah mise aad dooneeyso inaad xubin ka noqoto xisbig aocialdemokratiga, booqo hoyga Internetka ee socialdemokratigana.se mise wac taleefanka 08-700 27 27

Shaqaalaha waa saldhigga wanaagsan ee xannaanadda waayeelada
Hawlaha shaqaalaha xannaanadda waayeelada waxay waayahaan danbe noqdeen hawllo badan oo ballaaran. Waayahan danbe waxay la kulmaan waayeel qabo cudurro kala duwan, caqliga ka liito iyo kuwa afkooda hooyo aanan ahayn af iswiidishka. Maadaama shaqaalaha ay u baahan yihiin fursado ay ku horumariyaan kartida xirfadahooda, ayaa waxaa loo baahan yahay in la dejiyo hab karti xirafadeed qarmeed, laguna dhaqaaqo baaritaanka xeerka karti xirfadeedka ugu hoseeyo.

Tilaabada karti-xirfadeedka waa muruqgeli muhim ah ee ku wajihan daryeelka iyo xannaanadda waayeelada. Macneheedu waxay tahay in lacag lagu qiyaasay hal biljan lagu isticmaali doono muddo saddex sano ah, taaso lagu xoojin doono karti-xirfadeedka shaqaalaha. Sannooyinka 2006 iyo 2007 waxaa la kordhin doona shaqaalaha u shaqeeya maamulka degmooyinka. Shaqo qorida waxaa loo adeegsanayaa sida kor loogu qaado heerka adeegga, waxaana ka faa'iideysan doono daryeelka caafimaadka iyo xannaanadda waayeelada. Degmooyinka waxay heleen fursad ay ku qortaan dad muddo dheer shaqolaawe ahaa sida sare loogu qaado adeegga aqalada iyo hawlaha xannaanada waayeelada.

Dalka Iswiidan wuxuu noqon doona dalka ugu wanaagsan ee waayeelada
Tobbanka sano ee soocda waxaan sare u qaadi doona heerka muruqgelinta xannaanadda waayeelada, lacag dhan tobban biljan, taaso loogu talaggalay in lagu horumariyo xannaanadda waayeelada ee dalka oo idil. Qorsheha horumarinta qarmeed ee xannaanadda waayeelada waa qorshe gaar iyo guud ahaan ba lagu hagaajin doono daryeelka iyo xannaanadda waayeelada, siiba kuwa aad u xannuunsan, badbaadin lagu abuuro hoyga waayeelada, iyo laga sii hagaajiyo heerka bulshodeed ee xannaanadda waayeelada iyo hawlaha ka hortegida. Muruqgelinta waxay ka kooban tahay dhowr qodobo.

Waxyaalaha an ku talojirno in an ku dhaqaaqno waxaa kamid ah dhisida aqallada gaar ahaan loogu talaggalay waayeelada, wanaajinno daryeelka caafimaadka ee aqalka, iyado la kordhiyo tirada takhtarrada iyo kordhinta shaqaalaha. Waxaan kalo doonayna in an kordhinno karti-xirfadeedka daryeelka waayeelka caqliga ka dhibaataysan iyo an dhaqdhaqaqinno hawlaha ikhtiyaariga, xarumaha adeegga saxiibyada iyo abuurida goobo wadajir loo lee yahay. Hab siman loo qiiimeeyo baahida xanaanadda iyado fiirogaar ah la siin gobolka u waayeelka ku nool yahay, iyo in maamulada degmooyinka la siiyo fursad ay kumeelgaar ahaan adeeg u siiyaan waayeelka iydao la baarin baahida jirta.

Wax ku bediladeeda
Siyaasadayda xisbiga socialdemokratiga ee ku wajahan muruqgelinta xannaanadda waayeelada, waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo. Xisbiga

moderaterna wuxuu doonayaa in sare loogu qaado kharashka daawooyinka iyo booqashada isbitaalada, una ciribtiro sicir hoos u dhigida ee daawooyina. Teeda kale, waxay doonayaan in qofka qaato hawlgabnimo isagoo weli buuxsan shan iyo lexdan sano la siiyo magdhowga hawlgabka ee hooseeyo inta noloshiisa ka hartay. Iyago adeegsanaayo xisaabinta magdhowga hawlgabka ku salaysan oo aanan wanaagsanayn.

Nooca dalka Iswiidan u xisbigayga doonaayo innuu dhiso waa heer sare iyo horumar wanaagsan mudnaanta koowaad laga siinayaa hoos u dhigida heerarka canshuurta. Waayeelka waxay u baahan yihiin daryeel caafimaadeed oo dheeraad ah, sidaas awgeed-na si gaar ah u saamayn doonto korniinka kharashyada daawooyinka iyo booqashada isbitaalada.

Isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo waxay doonayaan in canshuurta ay hoos u dhigaan sida dalalka Yurub badidooda. Taasi macneheedu waxay tahay in khasnadda an wadjirka u leenahay ay ka jari doonaan lacag dhan 250, waxayna aad u saameeyneeysaa waayeelada. Waa arrin aad wax ugu beddeli doonto dalka Iswiidan – taaso keeni doonto in waayeelka u baahana daryeel iyo xannaanad u ka bixiyo jeebkiisa, mise kaalmo-dhaqaalee ka baryo qarabadiisa.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?